Soo bandhigga tijaaboyinka baarista dhalidda ka hor

Xulashoyiinkaaga waqtiga uurka

Waqtiga uurka, waxaa lagu siin doonaa fursad aad ku sameysatyo baaritaanyo badan oo kala duwan. Buug-yarahaan waxaa ku jiro macluumaad muhiim ah ee ku saabsan baaritaanyada dhalidda ka hor. Macluumaadka buug-yarahaan wuxuu kugu caawin doonaa inaad go'aan ka gaarto, in lagugu sameeyo iyo in kale qaar ama dhammaan baaritaanyada. Waxaad fursad u heli doontaa inaad umulisadaada ama takhtarkaaga kala hadasho baaritaanyada.

NHS'ta waxay natiijoyinka baaritaanyada oo dhan ku hayaan si qarsoodi ah. Siyaasadda isbitaalka ee ku saabsan inta qofood ee arki karo natiijoyinka baaritaanyadaada wuu kala duwan yahay. Umulisadaada ayaa kuu macneyn doonto hab-socodyada deegaankaaga.

Lambarkaaga NHS waa mid adiga gaar ku ah, lambarkaani ayaa lagu aqoonsan karaa qofka aad tahay kombyutarka NHS'ta. Haddii aad qabtid nuqulka lambarkaaga NHS, fadlan lambarka diyaar ha kuu noqdo markii aad goorta kowaad umulisadaada ku arkeyso ama isbitaalka u tegayso xannaanadaada hooyanimada.

Waa maxay tijaaboyinka baarista?

Tijaaboyinka baarista waxay kuu sheegi karaan xaaladaha caafimaad ee adiga ama ilmahaaga saamayn ku lahaan karo. Ma xaqiijin karaan in adiga ama cunuggaada xaaladdu saamayn ku leeyahay. Waxay muujinaayaan oo kaliya fursadda aad adiga iyo cunuggaada u leedihiin in xaaladdu saamayn idinku yeesho.

Haddii natiijada baaritaanka muujiyo inaad qabtid fursad sare in dhibaato gaar ah kugu dhaco, waxaa lagugu samayn doonaa tijaabada cudur-aqoonsiga. Tijaabada cudur-aqoonsiga wuxuu baxshaa natiijoyin ka xaqiiqo badan, laakin qar ka mid ah baaritaanyadaan waxay sababi karaan ilmo-dhicis. Sababtaan awgeeda, waxaa la siiyaa oo kaliya haweenada qaba fursad sare in dhibaato ku dhaco.

Sida dhammaan baaritaanyada caafimaad, natiijoyinka tijaabada baarista iyo tijaabada cudur-aqoonsiga 100% sax ma ahan.

Information for Women

© Public Health Wales

Waa maxay baaritaanyada la heli karo?

Waxaa lagu siin doonaa baaritaanyadaan.

Caadi ahaan inta u dhexeyo 11 ilaa 13 toddobaad

Skaanka dhawaaqa dheer waxaa lagu eegaa:

- imisa toddobaad oo uur ah ayaad tahay;
- haddii wadnaha ilmaha uu garaacaayo;iyo
- haddii aad hal cunug ka badan dhali doonto.

Uurka bilowgiisa, caadi ahaan 13 toddobaad ka hor

Waxaa lagugu samayn doonaa tijaabada dhiigga si loo baaro:

- cudurada wax-yeeleyn karaa ilmaha, kuwaani waa HIV, cagaarshowga nooca B iyo waraabowga;
- kooxda dhiigaaga iyo kooxda Rhesus, iyo haddii dhiiggaaga uu ku jiro unugyada difaaca jirka ;
- cuduro dhiig ee la iska dhaxlo, sida sickle cell iyo thalassaemia; iyo
- haddii difaac ka qabtid jadeecada.

Dhammaan baaritaanyadaan isla markiiba ayaa la samayn karaa. Waxaad xulan kartaa baaritaanka aad rabtid in lagugu sameeyo. Umulisadaada ayaa ku sheegi doonto meesha baaritaanka laga qaban doono.

Inta u dhexeyso 15 iyo 18 toddobaad

Baaritaanka xaaladda Down

Waxaa lagugu samayn karaa tijaabada dhiigga si loo ogaado fursad aad u qabtid inaad dhasho cunug qaba xaaladda Down. Baaritaanka waxaa la samayn karaa laga bilaabo 15 toddobaad oo uur ah.

Inta u dhexeyso 18 iyo 20 toddobaad

Waxaa lagugu samayn karaa tijaabada dhawaaqa dheer si lo eego haddii ay jiraan dhibaato habka uu cunuggaada u horumaraayo.

Information for Women

© Public Health Wales

Go’aan ka gaarista haddii aad rabtid in baaritaan lagugu sameeyo

Waa dhib in la ogaado baaritaanka la sameeyo. Dhowr haweeno ma rabaan inay ogaadaan haddii ay cudur qabaan oo saamayn ku yeelan karo ilmaha uurka ku jiro ama haddii ay dhibaato ka jiraan habka uu ilmaha u horumaraayo. Dad kale waxay rabaan inay ogaadaan si ay ilmahooda uga badbaadiyaan cudurada, haddii uu cunugga dhibaato wayn qabo, waxay rabaan inay haystaan fursad ay go’aan ka gaaran inay uurka joojiyaan.

Waqti u qaado inaad fikirto ka hor intii aadan go’aan gaarin. Waxaad baaritaanka kala hadli kartaa umulisadaada iyo takhtarkaaga, iyo waxaad weydiin kartaa su’aal walba ee aad qabtid. Waxaa baakadkaan ku jiro buug-yaro ee ku qoran macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan baaritaan walba.
Markii aad xulato baaritaanka aad rabtid in lagugu sameeyo, umulisada ayaa kula qaban-qaabin doonto. Waxay xittaa ku macneyn doontaa sida aad natiijoyinka u heli doonto. Natiijooyinka dhammaan baaritaanyada waa sir.

Haddii aad ra’yigaaga beddesho

Waxaad beddeli kartaa ra’yigaaga ku saabsan xulushayaashaada.

Haddii aad go’aansato in baaritaan lagugu sameeyo kadibna ra’yigaaga beddesho ka hor intii baaritaanka lagugu sameynin, fadlan xasuuso inaad umulisadaada u sheegto si ay ugu qorto diiwaankaaga hooyanimada.

Xulashooyinkaaga tijaaboyinka baarista dhalidda ka hor

Fadlan isticmaal foomkaan si aad u diiwangeliso xulashooyinkaaga ku saabsan baaritaanyada aad rabtid in lagugu sameeyo.

Information for Women

© Public Health Wales

Baaritaanka	**Haa,** Waxaan rabaa in baaritaanka laygu sameeyo	**Maya,** Ma doonaayo in baaritaanka laygu sameeyo	**Ma ogi.** Waxaan rabaa macluumaad dheeraad ah.
Skaanka dhawaaqa dheer ee Waqtiga horey ee uurka			
Baaritaanka HIV			
Baaritaanka Cagarshowga nooca B			
Baaritaanka Waraabowga			
Baaritaanka Jadeecada			
Baaritaanka kooxda dhiigga iyo unugyada difaaca jirka			
Baaritaanka cudurada dhiiggaa ee sickle cell iyo thalassaemia			
Baaritaanka xaaladda Down			
Skaanka dhawaaqa dheer ee cillad-raadinta ilmaha			

Fadlan xasuuso:

- waxaad xulan doontaa baaritaanyada lagugu sameyn dono;
- baaritaan laguguma samayn doono ilaa aad ka ogolaato;iyo
- haddii aadan u imaanin baritaan, xasuusin laguuma soo diri doono.

Macluumaad dheeraad ah

Galkaaga waxaa ku jiri buug-yareyaal ku saabsan:

- Cudurada iyo uurka;
- kooxda dhiiggaaga iyo uurka;
- skaanka dhawaaqa dheer markii uur la leeyahay;

Information for Women

© Public Health Wales

- Tijaabada baarista xaaladda Down markii uur la leeyahay; iyo
- Tijaabada baarista cudurada sickle cell iyo thalassaemia markii uur la leeyahay.

Waxaad xittaa macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan tijaaboyinka baarista ka heli kartaa umulisadaada ama takhtarka isbitaalkaaga iyo bogga internetka: www.antenatalscreening.org.

CARIS waa Diiwaanka iyo Adeegga Macluumaadka Cillada Hiddo-wadayaasha ee Welsh'ka.

CARIS wuxuu aruuriyaa macluumaadka ku saabsan dhibaatoyinka habka ay carruurta ugu horumaraan uurka. Dhibaatoyinkaan waxaa loogu magacaaba cilladaha hiddo-wadayaasha sababa, curyaanimo ama cilladaha dhalashada. Waxaa ka mid ah dhibaatoyinka sida xaaladda Down, cilladaha wadnaha ama farruur jeexa.

Aad ayuu muhiim u yahay in wax ka badan laga ogaado dhibaatoyinka noocaan ah iyo waxyaabaha sababey.

CARIS wuxuu macluumaadka u isticmaalaa sidii uu ku ogaado sida ay caadi u yihiin dhibaatoyinkaan. Macluumaadka uu CARIS soo aruuriyo wuxuu xittaa ku caawiyaa in lagu ogaado haddii adeegyada caafimaad ku fiican yihiin ogaanshada dhibaatoyinka noocaan ah.

Haddii tijaabada baaristaada laga shakiyo in dhibaatoyinka noocaan ah ku qabtid uurkaaga, umulisada ama takhtarka ayaa macluumaadkaan u gudbin doono CARIS.

Macluumaadka ee lagu haayo diiwaanka CARIS si adag ayuu sir u yahay. Weligeena magacaada qofna uma gudbin doonno ama weligii ma daabaci doono.

Haddii aadan rabin in umulisadaada ama takhtarkaaga u gudbinin CARIS macluumaad ku saabsan adiga ama cunugga, fadlan u sheeg umulisadaada si ay kani ugu qorto warqadahaada iyo u sheegto CARIS inaadan rabin inay isticmalaan macluumaadkaaga.

© Xuquuqda Daabacadda 2010. Ururka NHS ee Caafimaadka Shacbiga Wales. Dhammaan xuquuqyada u xiran. Lama ogola in gebi ahaan ama qayb ahaan nuqul laga sameysto ayadoo fasax laga helin milkiilaha xuquuqda daabacadda.
www.antenatalscreening.org
Abriil 2010
CP Daabacadda 9aad

Information for Women

© Public Health Wales